



San Diego Unified School District

EUGENE BRUCKER EDUCATION CENTER
4100 Normal Street, San Diego, CA 92103-2682

William A. Kowba
Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada Ku-meel-gaadh

Febraayo 2008

Mudane Waalidiin ama Qofka ilmaha masuulka ka ah:

Maalintii Sabtida ee bisha Janaayo 19 ahayd waxay Guddiga Waxbarashaddu si buuxda isugu raaceen in Dr. Terry Grier uu noqdo Madaxa Waxbarashadda ee Degmada San Diego. Bilaha soo socda, waxaan si ku-meel-gaadh ahaan ugu shaqeyn doonaa Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada, inta uu Dr. Grier uu hawshiisa North Carolina ka soo dhammeynayo.

Wakhtigan aan ku-meel-gaadh ahaanta u shaqeynayo waxaan idin la socodsiineyaa in muhimada iigu weyn ay tahay in dhammaan ardeydu helaan waxbarasho tayo sare leh. Waxaan idiin ka mahadcelineyaa taageerada aad ka geystaan waxbarashadda guriga iyo kaalinta weyn ee aad ka qaadataan hagaajinta dugsiyada.

Maalin kasta waxay waalidiintu dugsiyada ka sameeyaan waxyaabo wanaag leh. Ujeeddadeennu waxaa weeyaan inaan waalidiinta si wacan ugu soo dhaweyno dhismaha dugsiyadeenna. Ilaa intii aan sannadkii hore bilownay Saaxiibtinimada Dugsiyada iyo Qoysaska, waxaa aad u kordhey waalidiinta iyo dadka iskaa-wax-u-qabso kaga shaqeeya dugsiyada. Dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya waxay dugsiyada ka shaqeeyeen un ka badan hal malyan oo saacadood. Waxaan ku rajo weynahay in taageerada aan na siisaan inaan tirada sannadkan sii kordhiin doono!

Sannadkii la soo dhaafay, dugsiyada San Diego Unified waxay sameeyeen horumar iyo guulo aad u waaweyn. Dugsiyo cusub ayaa la dhisay, kuwo duug ahaana waa la cusbooneysiyeey. Waxaa guulo laga gaadhay xagga waxbarashada iyo barnaamijyada dugsiyada degmada ka dhex socda. Waxaan sii wadnay inaan dhaqaale saldhig adag leh sameyno. Dhammaan guulahaas la gaadhey waxay ku yimaadeen dadaalkii iyo shaqo wanaagga ay sameeyeen macallimiinta, maamuleyaasha, waalidiinta, ardeyda iyo shaqaalaha degmada. Waxaan ku rajo weynahay inaan guulahaas halkaas ka sii wadno, oo aan dugsiyadeenna uga dhigno kuwo Maraykanka ugu Wanaagsan.

Bilahan soo socda, waxaan booqasho ku tegi doonaa dugsiyada degmada San Diego ku yaala. Waxaan ku rajo weynahay inaan halkaas ku kulmi doono si aan uga wada hadalo waxabarasho ilmahaaga.

Si Xushmad leh,

William A. Kowba
Madaxa Waxbarashadda dugsiyada Ku-meel-gaadh
Somali version: 02-08 Parent Ltr